

Waaxda Ohio ee Shaqada iyo Adeegyada Qoyska
BARNAAMIJKA CAAWIMAADA CUNTADA EE DEGDEGA AH
BARNAAMIJKA CUNTO EE GOBALKU MAALGALIYO

TILMAAMAHA UQALMIDA DADKA GURIGA KUWADA NOOL EE DHAQANGALAYSA LUULIYO
1,2021

XAJMIGA DADKA GURIGA KUNOOL	DHAQAALAHA		
	SANADKA	BISHA	USBUUCA
1	\$25,759	\$2,146	\$495
2	\$34,839	\$2,903	\$669
3	\$43,919	\$3,659	\$844
4	\$52,999	\$4,416	\$1,019
5	\$62,079	\$5,173	\$1,193
6	\$71,159	\$5,929	\$1,368
7	\$80,239	\$6,686	\$1,543
8	\$89,319	\$7,443	\$1,717
9	\$98,399	\$8,199	\$1,892
10	\$107,479	\$8,956	\$2,066
XUBIN KASTA OO GURIGA JOOGTA OO DHEERI AH KUDAR	\$9,080	\$757	\$175

Macaamiisha waxay cadaynayaan in dhaqaalahooda guud ee dadka hada guriga kunool uu yahay ama kahooseeyo dhaqaalaha kuqoran foomkaan ee dadka guriga kuwada nool ee leh isla tirada dad ah ee kunool guriga. Macaamiisha waxay sidoo kale cadaynayaan, maanta laga bilaabo, in qofka guriga dagan uu kunoolyahay aaga ay kashaqayso wakaaladaan. Macluumaadkaan waxaa lagu bixiyaa ayadoo lagu xiraayo caawimaada dawlada Federalka ah ee lasoo mariyo Barnaamijka Caawimaada Cuntada ee Degdega ah iyo/ama barnaamijka cuntada ee gobalku maalgaliyo.

Ayadoo laraacaayo sharciga Federalka ah ee xquuqda madaniga ah iyo shuruucda iyo siyaasadaha Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), USDA, wakaaladaheeda, xafiisyadeeda, iyo shaqaalaheeda, iyo dhinacyada kaqaybgalaaya ama maamulaaya barnaamijyada USDA waxaa mamnuuc ka ah inay sameeyaan takoor kusalaysan isir, midab, wadanka qofku uu kasoo jeedo, jinsiga, curyaanimo, da', cadgoosi ama aargoosi ee shaqooyinka kahor xuquuqda madaniga ah ee barnaamijkasta ama shaqo ay fulisay ama ay maalgalisay USDA. Dadka naafada ah kuwaasoo ubaahan hab gaar ah in loola hadlo si ay uqaataan macluumaadka barnaamijka (tusaale. Qoraalka indhoolada, Daabacaada farta waawayn, cajalada, Luuqada Ishaarada ee America, iwm.) waa inay laxariiraan wakaalada (mida gobalka ama tan deegaankooda) meesha ay kacodsadeen faaiidooyinka. Dadka dhagoolka ah, maqalkoodu culusyahay ama qaba curyaanimo dhanka hadalka ah waxay kala xariiri karaan USDA ayagoo usoo maraaya Adeegga Warqabadka Federalka kanawacaan nambarka (800) 877-8339. Intaas waxaa siidheer, macluumaadka barnaamijka waxaa lagu helikaraa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Si aad ugudbisno dacwad takoor oo kadhah ah barnaamijka, buuxi [Foomka Cabashada Takoorka ee Barnaamijka USDA](#) (AD-3027) oo si online ah looga helo: http://www.ascr.usda.gov/complaint_filing_cust.html, iyo xafiiskasta oo USDA, ama qor waraaq aad kuhagaajiso USDA kun she waraaqda dhamaan macluumaadka foomka lagu codsaday. si aad ucodsato nuqul kamida foomka cabashada, wac (866) 632-9992. Ugu dir foomkaaga ama waraaqda aad buuxisay USDA:

(1) boostada: U.S. Department of Agriculture Office of the Assistant Secretary for Civil Rights 1400 Independence Avenue, SW

Washington, D.C. 20250-9410; (2) fax: (202) 690-7442; ama (3) email ahaan: program.intake@usda.gov.

USDA waa xarun bixisa fursado loo simanyahay iyo shaqaalaysiiye.

Tilmaamaha Barnaamijyada Cuntada waxaa lagu helaa ayadoo lagu dhufanaayo tixraacyada faqriga ee dhaqaalaha ee Federalka 2, lagana jaraayo \$1.00 laguna soo koobaayo tirada guud ee xigta ee halka doolar. Tilmaamaha asbuuc laha iyo bilaha waxaa lagu xisaabshaa ayadoo loo qaybinaayo dhaqaalaha sanadkiiba 52 iyo 12, siday iskugu xigaan, laguna soo koobaayo tirada guud ee xigta ee hal doolar.